

Suurat Al-Ikhlaas سُورَةُ الْاِخْلَاصِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) Eebe waa Kali (wehelna ma leh).
2. Waana Sayid (deeqtoon).
3. Eebe wax ma dhalin, isna lama dhalin.
4. Wax la mid ahna ma jiro.

قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ ١

اللَّهُ الصَّمَدُ ٢

لَمْ يَكِدْ وَلَمْ يُولَدْ ٣

وَلَمْ يَكُنْ لَهُ كُفُوًا أَحَدٌ ٤

Suuraddani waa Suurad gaaban, hasa yeeshee waa Suurad aad iyo aad u wayn, waxayna soo dagtay markay Gaaladii Qureesheed Nabiga ku dheheen Eebahaaga noo tilmaan, wuxuuna Eebeheen ku cad-deeyay Suuraddan inuu Kali yahay, Maxaa yeelay? wehel uma baahna, inuu Sayid kaaf-toonyahay'Dadkuna u baahanyihiin, inuusan wax dhalin siday Gaalada qaarkood sheegtay, Wax la mid ahna uusan Jirin.

Bukhaari wuxuu wariyey inaan Eebbe Cidna uga adkaysin badnayn dhibuu maqlay, ilmay u sheegeen isna wuu arsuqaa oo caafiyaa.

Hadalkii Eebe ee Qudsiga ahaa waxaa ku sugnaaday: Ibnu aadam wuu i beeniyey kumana haboona, wuuna i caayey kumana haboona, beenintiisu waa inuu yidhi iima soo celiyo siduu igu billaabay, bilawgu-na iigama fududa soo celinta, caydiisuna waa inuu yidhi: Eebe ilmuu yeeshay, anna waxaan ahay keli Sayid ah, mana dhalin laymana dhalin wax ila mid ahna ma jiro.

Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Ikhlaas (1-4).

Suurat Al-Falaq سُورَةُ الْفَلَقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaan ka magangalay Eebeha Subaxa (abuurray).
2. Wixii shar leh sharkiisa.
3. Iyo Habeenka sharkiisa markuu madoobaado.

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ ١

مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ ٢

وَمِنْ شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ ٣